

# Codeynta adigoo leh Diwaan Danbi

Diiwaanka dembigaagu **ma** saamaynayo xaqa aad u leedahay inaad ka codayso gudaha Minnesota ilaa aad waqtii xaadirkan ku xukuman tahay dembi culus mooyee Aadna ku jirto xarunta asluubta (xabbisan).

## Codeynta dadja danbiyada culus ku xukuman

Waxaad ka codayn kartaa Minnesota adiga oo lagugu xukumay dambi culus ka dib markii lagaa soo daayo xarunta asluubta.

- Xaqaada inaad codeyso waa la soo celinayaan marka aad dhammaysato xukunka dambiga culus. Waxaad xaq u leedahay inaad codayso haddii laguu sii daayo inaad aado shaqo (work release), lagugula socdo guriga, xilli hore lagaa soo sii daayay xabsiga (parole), ama seeto-dheere (probation).
- Waxaad xaq u leedahay inaad codayso haddii aad xabsi ku jirto, sugayso eedaymo, lagu xukumayo ama haddii kale lagu xabisay.
- Ma codayn kartid haddii aad xukun dembi culus ah ku qaadanayo xarunta asluubta (xabisaan).

Booqo [mnvotes.gov](http://mnvotes.gov) si aad u hesho macluumaadka diiwaangelinta ama aad u buuxiso codsi.

## Ma hubtid miyaa xaaladaada sharci?

Haddii aad su'aalo ka qabtid diiwaankaaga, waxaad la hadli kartaa sarkalkaaga/wakiilkaaga seeto-dheerada (Probation) ama waxaad ka wici kartaa Minnesota Department of Corrections 651-361-7200 lana hadli kartaa waaxda diiwaanada.

## Miyaan ka codeyn karaa Minnesota haddii...

Ilaygu soo oogay ama laygu helay fal-dambiyeed culus ama mid?

**HAA**

Aan ku jiro xabsiga, sugaya maxkamad ama xukun?

**HAA**

Aan ku jiro xabsiga inta aan ku jiro seeto-dheerada (probation) / xilli hore kasii daynta xabsiga (parole) dambiga awgiis, laakiin aan la ii xabisin xukun danbi culus?

**HAA**

Laygu soo oogay dambi, laakiin aan lay xukumin?

**HAA**

Lay siiyay joogitaan xukun maxkamadeed (stay of adjudication)?

**HAA**

Aan ku jiro seeto-dheerada (probation) / xilli hore kasii daynta xabsiga (parole) dembi aan ka galay gobol kale?

**HAA**

Aan ku jiro seeto-dheerada (probation) / xilli hore kasii daynta xabsiga (parole) dembi aan ka galay gobol kale?

**HAA**

Aan ku jiro shaqo u sii deyn, kala socoshada intaan jooga guriga, seeto-dheerada (probation), ama la iga sii daayo xilli hore xabsiga (parole) iyadoo lay kormeerayo dembi culus awgiis?

**HAA**

Aan ku jiro seeto-dheerada (probation) / xilli hore kasii daynta xabsiga (parole) dembi aan ka galay federaalka?

**HAA**

Aan ku qaadanayo xukun culus xabsiga, guriga shaqada, ama Xarunta Asluubta Dadka Waaweyn?

**MAYA**

Aan hadda ku qaadanayo xukun dembi culus xabsiga gobolka ama federaalka?

**MAYA**



[hennepin.us/elections](http://hennepin.us/elections)